



War-Saxaafad

Barnaamijka Gar-gaar Ganacsatada Yar-yar Waxaa labilaabayaa Arji Qabashadiisa Juun 23. Waxaa La Diyaariyay Gar-gaar Dhan 60 Milyuun oo Deeq Ahaan Loo Siinayo Ganacsatada Yar-yar Eey Dhibta Ka soo Gaadhay COVID-19

St. Paul—Hay'ada Minnesota Department of Employment and Economic Development (DEED) ayaa shaacisay [Barnaamijka loogu deeqayo Ganacsatada Yar-yar](#) ee Minnesota—Barnaamijka oo ay ansixiyeen Golaha Sharci-dajinta ee Minnesota usbuucii hore, waxaana saxeexay Gudoomiyaha Gobalka Tim Walz Talaadadii—waxaana bilowmi doona aqbalaada arjiyada usbuuca soo socda.

Barnaamijkan wuxuu siin doonaa \$10,000 doolar ganacsiyada yar-yar eey saameysay COVID-19. Ganacsiyadan ooy shaqaalahood dhan yihiin 50 qof ama ka yar intaa. Kalabar maaliyadu waxay aadi doontaa meheradaha ku yaal Magaalooinka waaweyn banaankooda, badhka kalana waxaa la siin ganacsatada todabda degmo iyo maagaalooyinka Mataanaha, sida uu sharcigu farayo.

Shuruudaha dheeriga waxaa ka mid ah:

- \$18 milyan waxaa loogu talagalay ganacsiga eey si buuxda uga shaqeeyaan shaqaale ka kooban lix qof ama ka yar
- \$10 milyan shirkadaha eey lee yihiin dadka ganacsatada ee laga tiro badan yahay
- \$2.5 milyan ganacsatada ciidanka ka fadhiistay
- \$2.5 milyan ganacsatada haweynka
- \$2.5 milyan tafaariiq-leyda ka shaqeysato suuqyada cuntada oona leh dhaqamo qowmiyadood

“Ganacsatada yaryar ee ka hawlgala gobolka oo dhan waxay si deg-deg ah ugu baahan yihiin gargaarkan,” ayuu yiri Gudoomiyaha DEED Steve Grove. “DEED waxay bogaadineysaa tallaabada laba geesoodka ah ee lagu ansaxinayo sharcigan. Waxaan ooga mahad celineynaa gudoomiye Walz inuu si dhaqso ah u saxiixay sharciga si aan dhaqso u kicino barnaamijka deeqda ah.”

Xiliga dalabka-arjiga wuxuu bilaabanayaa Talaado, Juun 23 wuxuuna xirmayaa 5:00 galabnimo Khamiista Luulyo 2 silo oofiyo 10ka maalmood ee sharcigu dhigayo. Nidaam bakhtiyaa-nasiib ah oo kombutar ayaa isticmaali doono; kaas oo soo uli doono ganacsatada u qalanta abaal-marinta.

Abaalmarinada oo dhan waxaa maamuli doona wakaaladaha samafalka ee maxaliga ah oo aqoon u leh gobalka, iyo deeqaha. Deeqda waxaa loo isticmaali karaa raasamaalka shaqada si loo taageero kharashaadka bixinta mushaarka, kirada, bixinta amaahada guryaha, biilasha adeegyada, iyo kharashaadka kale ee ganacsiga ee la midka ah.

Si aad xaq ugu yeelatid ka qeybgalka, maheraduddadu waa inay daganaansho rasmi ah ku leedahay gobolka Minnesota, dadka lehna deganaansho jooqta ah ku lee yihiin Minnesota. Ganacsaduhu waa inuu muujiyaa xaalad adag oo ka dhalatay faafitaanka COVID-19. Shuuradaha dheeriga ah ee uqalmanaanta deeriga macluumaadkooda

waxaad si toos ah uga heli kartaa Khadka DEED Deeqaha Ganacsatada yarya beejkooda. DEED waa wakaalada horumarinta dhaqaalaha ee gobalka ugu weyn, kobcinta shaqaalaysiinta ganacsiga, ballaarinta iyo haynta, horumarinta shaqaalaha, ganacsiga caalimaga ah iyo horumarinta bulshada. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan hay'adda iyo adeegyadadeeda ka baadho [websaydhka DEED](#) ama raac bogga [DEED ee Twitterka](#).



U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanto, arjiiluhu waa inuu:

- Noqdaa meherad ganacsi gaar loo leeyahay oo macaash joogto ah ku leh gobolka Minnesota.
- Mulkiilayaasha badankood waa inay si joogta ah u dagenyihiin Minnesota.
- Si wanaagsan uga shaqo gasha Xarunt Xoghayaha Gobolka Minnesota iyo Waaxda Dakhliga Minnesota illaa iyo Maarso 1, 2020.
- U Shaqeeyaan 50 qof ama in ka yar shaqaalaha waqtiga buuxa.
- Awood u yeelan kara inaad muujiso dhibaato dhaqaale oo ka dhalatay faafaanka COVID-19.
- XUSUUS: Ganacsiyada helay maalgalinta Barnaamijka Daynta Ganacsiga Yaryar (SBEL) uma qalmaan barnaamijkan. (Si kastaba ha noqotee, meheradaha ku helay maalgalinta barnaamijyada amaahda Maamulka Ganacsiga Yaryar ee kala duwani wali way u qalmaan barnaamijkan.) Marka la bixinayo abaalmarinno, waxaa jira qaabilayaal ugu hooseeya oo loo dejiyey kooxo kala duwan oo la bartilmaameedsaday iyo qaybaha ganacsiga.
- 50% lacagaha waxaa loo qoondeeyay ganacsiyada ku nool Greater Minnesota.
- 50% lacagaha waxaa loo qoondeeyay ganacsiyada ku nool 7-degmo eek ala ah (Anoka, Carver, Dakota, Hennepin, Ramsey, Scott, iyo Washington).
- Lacagta ugu yar waa in la bixiyo sida soo socota:
 - o \$ 18 milyan ganacsatada leh lix ama ka yar oo shaqeeya waqti-buuxa.
 - o \$ 10 milyan shirkadaha ganacsiga eey leeyihiin dadka laga tiro badan yahay.
 - o \$ 2.5 milyan ganacsiyadu inta badan ay leeyihiin oo ay ka shaqeeyaan halyeeyo.
 - o \$ 2.5 milyan oo loogu talagalay ganacsiyada ay badanaa leeyihiin oo ay leeyihiin haweenku.
 - o \$ 2.5 milyan oo loogu talagalay dadka ka shaqeeya tafaariiqda gudaha iyo suuqyada cunnada oo leh dhaqan dhaqan qowmiyadeed leh.

Arjiga

Xiriirka arjiga ee internetka lagu buuxinaya waxaa la furi doonaa **Talaadada, Juun 23, 2020 illaa 5:00 p.m. Khamiista, Luulyo 2, 2020.**

Arjigu wuxuu ku weydiin doonaa su'aalo kala duwan oo la xiriira ganacsigaaga. Looma baahna in dukumiintiyada la soo lifaaqo. Su'aalaha waxaa ka mid ah:

- Ayaa leh meheradda?
- Aaway milkiiluhu?
- Halkee meheraddu ku taal?
- Immisa shaqaale oo waqti-buuxa ayaa meheradda ka shaqeeya?
- Meheradda ma ka diiwaangashan tahay Xoghayaha Gobolka Minnesota?
- Diiwaangelintaadu miyey shaqeyneysaa laga bilaabo Maarso 1, 2020? Booqo boggan wixii macluumaad ah.
- Ganacsigaagu meel wanaagsan ma kaga jiraa Waaxda Dakhliga ee Minnesota illaa iyo Maarso 1, 2020?
 - Miyuu ganacsigaagu la kulmay dhibaato dhaqaale oo ay ugu wacan tahay COVID-19 marka loo eego waqtigan sanadkii la soo dhaafay?
 - Ma meheraddaada saamayn ma ku yeelatay Amarada Fulinta ee la xidhiidha COVID-19 oo xaddiday awoodda meheraddaadu ku shaqeyso?